# JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# GOLAHA WAKIILADDA

**GUDDIDA ILAALINTA IYO DABAGALKA HANTIDA QARANKA**

## WARBIXINTA KULAMADII DHEXMAREY GUDIDDA IYO HANTI-DHOWRAHA GUUD EE QARANA IYO BUUGA XISAAB-XIDHKA 2013 EE HANTI-DHAWRAHA GUUD USOO GUDBIYEY GOLAHA WAKIILADA JSL

© Golaha Wakiiladda

Website: www.somalilandparliament.net Email: - info@somaillandparliament.net

## Tusmada Warbixinta.

HORDHAC:- 3

WARBIXINTA HAY'ADDA HANTI-DHAWRKA IYO WADASHAQAYNTA GUDDIDA KA DHAXAYSA OO KOOBAN:- 3

XISAAB XIDHKA 2013 HANTI-DHOWRAHA GUUD GOLAHA WAKIILADA U SOO GUDBIYAY:- 6

WAAJIBAADKA IYO AWOODA HANTI-DHAWRAHA GUUD:- 7

WAXYAABIHII GUDDIDA UGA SOO BAXAY BUUGII XISAABXIDHKII 2013 EE HANTI DHAWRUHU USOO GUDBIYEY:- 7

TALO SOO JEEDINTA GUDDIDA:- 10

GABO-GABO:- **ERROR! BOOKMARK NOT DEFINED.**

## Hordhac:-

Golaha Wakiiladu iyagoo markasta gudanaya waajibaadkiisa sharci ee Dastuuriga ah iyo shaqooyinka kale ee qarankani u hayaan, waxay markasta ka Gole ahaan iyo ka Gudi ahaanba uu xil inaga saaran yahay Ilaalinta iyo Daba-galkaHantida Qaranka, waxaynu kale oo aynu kulamo ugu yeedhnaa madaxda qaranka si aynu uga xog-waraysano  hawlaha ay qaranka u hayaan.

Guddidan Ilaalinta Iyo Daba-galka Hantida Qaranku waxay ka mid tahay tobanka Guddi ee uu Golahani ka kooban yahay, waxaanay masuul ka yihiin arrimaha la xidhiidha Ilaalinta Hantida Qaranka, koormeeridda Ilaha Dhaqaalaha iyo Wax ka waydiinta xil-gudashada Masuuliyiinta kala duwan Laamaha Dawlada.

Guddidan Ilaalinta Iyo Daba-galka Hantida Qaranku iyagoo dar-dar-glinaya hawlaha Golahu u xilsaaray waxay la kulmeen Hantidhawaraha guud iyagoo wax ka waydiiyey xisaab-xidhka 2013 uu Golaha horkeenay  iyo Hawlaha uu qarankan u hayo. Waxay sidoo kale idiin soo diyaariyeen warbixin ku saabsan Hay'adda lafteeda xidhiidhka ay golaha iyo guddidan la leedahay iyo ilaa hada xogaha dhexmaray iyo aragtida Guddida.

## Warbixinta Hay'adda Hanti-dhawrka iyo wadashaqaynta Guddida ka dhaxaysa oo kooban:-

Hay'adda Hantidhawrka Qaranka waxa waajibiyey aasaaskeeda iyo jiritaankeeda Dastuurka Qaranka Qodobkiisa   113aad Farq.4aad hab maamulka hay'addan iyo siday shaqadeeda u gudanaysana waxa Madaxbanaaneeyey  Xeer. Lr. 05/98.

Hay'adda Hantidhawrku maamul ahaan waa Gudoomiye, ku-xigeen,  Agaasime iyo madaxda waaxaha ee qaybaha kala duwan ee hay'adda waxaana dhamaan Hogaamiya Hanti-dhawraha guud ee Qaranka oo Madaxwaynahu magacaabo sida waajibka ahna laga ansixiyo Golaha wakiilada.

Sida ay waaajibinayaan Qodobada 9aad farq (B)  ee Xeer LR 05/98 oo Golahan laga ansixiyey Hanti-dhawrku wuxuu Golaha Wakiilada u soo gudbinayaa Warbiximaha uu siiyo madaxweynaha Nuqul ka mid ah iyo sidoo kale haddii maamul xumo ama gefaf xisaabeed yimaadaan.

Waxaa kaloo ku waajiba Hanti-dhawaraha Qaranka inuu Golaha Wakiilada u soo gudbiyaan Xisaab-Xidhyada, isla markaana sida Hay'addaha kale ee Qaranka waa inay Golaha siiyaan xogaha iyo warbiximaha looga baahdo Hay'adda lafteeda.
Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka GolahaWakiilada JSL iyagoo ah guddida sida gaarka ah shaqadu uga dhaxayso kamay helin wax wada shaqayn dhow ah iyo xogahay uga baahdeen midna.

Marka laga reebo inaanu hanta-dhawrahu ka daahin kulamada ay ugu yeedhaan, taas oo uu uga waramo musuqmaasaqyo faro badan oo hadheeyey xukumada hase ahaatee aanu marna soo hordhigin wax cadaymo ah amaba warbixino khuseeya musuqmaasuq yadaas uu ku eedaynaayo Hay'ada dawlada.

Tusaale, Gudidu waxay Hanti-dhawraha la qaadatay kulamo aad faro-badan labadii Sano ee ugu danbeeyey.

Waxaanay qoraalo faro-badan u qortay Xafiiska Hanti-dhawraha kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwan sumadoodu ay hoos ku qoran yihiin:-

1. **GW/G/01/57/2012**
2. **GW/G/01/73/2012**
3. **GW/G/01/98/2013**
4. **GW/G/01/20/2013**
5. **GW/G/01/10/2014**
6. **GW/G/01/24/2014**
7. **GW/G/01/194/201**

Dhamaan waraaqahaas iyo kulamadaas aanu la galnay nuxurka dalabka Gudiddu wuxuun buu ahaa qaar isku mida waxaanuna ka dalbanaynay saddexdan qodob ee halkan hoose kuqoran:-

1. U soo gudbint Guddida Warbiximaha Sanadlaha ah. (Annual Report)
2. Warbiximaha Hay'adaha uu baadhay iyo Gunaanadkooda
3. Warbixin xisaabeedka hay'adda lafteeda iyo hantideeda guurtada ah iyo maguurtada ah.

Codsiyadaas iyo dalabyadaas ay Guddidu waydiisatay, mar walba Hanti-dhawrahu wuxuu Guddida ka codsadaa in ay siiyaan waqti aan kabadnayn 10 malmood, 5 maalmood, mararka qaarkood  2 wiig.

Guddida Ilaalinta iyo dabagalka Hantida Qaranku iyagoo markasta tixgelinaaya wadashaqaynta Xafiiska Hanti-dhawraha, tixgelisana codsiga kaga yimaada Hanti-dhawraha Qaranaka, Dhamaan balanqaadyada Hanti-dhawrahuna waxay ku dhamaataa mid aan waxba ka fulin.

Mararka qaarkoodna wuxuu Hanti-dhawraha Guud noo soo qorayay waraaqo nuxur ahaan ka duwan wixii aanu ka dalbanay, oo aanu u aragnay uun isdiidsiin iyo ka cagajiid, Gudidu siwadar iyo si shakhsiyaad ahba waxay uga hawlgaleen hirgelinta wadashaqayn dhexmarto Hay'addaas iyo Golah si loo gaadho Hadafkeena Qaran ee aynu higsanayno.

Ka dib markaanu in badan eegaynay Xogona ka urur-sanaynay Hay'adda Hanti-dharka Guud waxaanu noo soo baxday in:-

1. In Aanay wax wada shaqayni ka dhexayn madaxda u saraysa Hay'ada, Gudoomiyahuna Lumiyey Nidaamkii wadasghaqayneed ee Hay'adda.
2. In Shaqada Hay'addu ay ku kooban tahay Gudoomiyaha oo uuweheliyo agaasimaha Dawlada dhexe.

3. In Hay'adu noqotay Hay'addaha ugu hoosaysa tayo ahaan intii aanu la kulmaynay madaxda qaranka, anagoo Hay'adaha ku qiimayna warbixinada ay nasiiyaan  iyo xogo oo aanu badanaa ka helno siyaabaha ay hayadahu amaba wasaaraduhu ku gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

4. In Gudoomiyahu aanu ogolayn in xogo qoraala uga gudbiyo Golaha Musuqmaasaqa xukumada hadheeyey ee uu afka ka sheegaayo.

5. In Hay'adda laftigeedu aanay ka madhnayn maamul xumo baahsan oo dhexdeeda ah taas oo sababi karta wax isdaba marin.

## Xisaab Xidhka 2013 Hanti-dhowraha Guud Golaha Wakiilada u soo gudbiyay:-

Awooda Dastuuriga ah ee Golaha WakiiladaDastuurka Jamhuuriyada Somaliland sida ku cad **Qodobka 55aad** wuxuu tilmaamayaa in doorka iyo awooda Goluhu u leeyahay Miisaanaiyada iyo sidoo kale sida ku cad **Farqadaha 5aad, 6aad iyo 7aad** ee Qodobkan 55aad wuxuu awood u siinayaa Dastuurku Golaha Wakiilada Xisaab xidhada Miisaaniyad kasta markey dhamaato lixbilood gudohood iyadoo hanta-dhowraha Guud uu Golaha u soo gubinayo, isagoo Qodobkani farqadihiisu kala yihiin:

1. Golaha Wakiiladu waxa uu ka doodi karaa, waxna ka beddeli karaa miisaaniyadda, kuna ansixinayaa go'aan Gole.

2. Haddii ansixinta miisaaniyadda cusubi dhammaan weydo ka hor bilowga sannad-maaliyadeedka cusub, waxa lagu dhaqmayaa miisaaniyaddii hore inta ay ka soo baxayso miisaaniyadda cusubi.

3. Golaha Wakiilada ayaa oggolaanaya gelidda kharash kasta oo aan miisaaniyadda ku jirin.

4. Xeer ayaa caddaynaya habka soo diyaarinta miisaaniyadda guud iyo sannadmaaliyadeedka.

5. Xeer ayaa caddaynaya miisaaniyadda iyo xisaab-xidhka hay'adaha, wakaaladaha iyo shariikadaha dawladeed ama kuwa ay wax ku leedahay iyo u soo bandhigidooda Golaha Wakiilada.

6. Waa waajib u soo bandhigidda Golaha Wakiilada xisaab-xidhka sannadmaaliyadeedkii dhammaaday muddo aan ka badnayn lix bilood oo ka bilaabanta taariikhda dhammaadka sannad-maaliyadeedka, iyadoo Golaha Wakiilladu ka doodayo, go'aanna ka soo saarayaan.

7. U soo bandhigidda xisaab-xidhka miisaaniyadda waxa u xilsaaran Hantidhawrraha Guud.

## Waajibaadka iyo awooda Hanti-dhawraha Guud:-

Sida ku xusan Xeerka Hanti-dhawraha Xeer Lr. 5/98, **Qodobka 16$^{aad}$ Farqadiisa C** oo odhanaysa:-

- Hanti-dhawrka Guud markuu baadho xisaab-xidhka sannadka ayaa hanta-dhawraha guud wuxuu diyaarinayaa warbixin sanadeedkii hantidhawrka, Waxaanu warbixintaas oo ay la socdaan nuquladii cadaynta hanta-dhawraha Guud ee sugnaanta xisaabaadka uu u gudbinayaa Golaha Golaha Wakiiladda ugu dambayn 30$^{th}$ June Sanad kasta.

## Waxyaabihii Guddida uga Soo baxay Buugii xisaabxidhkii 2013 ee Hanti dhawruhu usoo gudbiyey:-

Mudanayaal mar walba waxaynu sanadkasta ansixinaa Miisaaniyad sanadeed Qarankani leeyahay taasi oo dhamaan Hay'addaha Dawlada oo dhami mid kastaa ay ugu jiraan qarashaadka ay isticmaali lahayd mudo laba iyo toban bilood ah.

Haddaba, sida qodobadan kor ku xusani dhigayo waxaa inagu waajiba Gole ahaan in Miisaaniyad kasta oo aynu ansaxino helno Xisaab-Xidhkeedii si aynu u hubino qoddobadan hoos ku xusan:

1. Dakhligii Miisaaniyada la rajaynaayey ma soo baxay isagoo dhamaystiran, Dakhli dheeraadi ma soo baxay, mise waxaaba soo baxay dakhli ka yar kii aynu rajaynayanay.

2. Miisaaniyada isticmaalkkeeda ma loo raacay siday Golaha wakiiladu u ansixiyey iyo sida ay waajibinayaan Xeerarka kale ee wadanka u yaala.

3. Baadhitaanka Hanti-dhawrahu ma tahay mid dhamaystiran oo cadaymaheeda wadata, ma u raacayse shaqadiisa sida ay farayaan shuruucda dalka u taala.

Guddidan Ilaalinta Iyo Dabagalka Hantida Qaranku iyagoo Uga wakiila Golaweynaha Xisaab-xidhyada Miisaaniyada waxay warbixin kooban ka diyaariyeen Xisaab Xidhkii 2013 ee Hanta-dhawraha Guud usoo gubiyey Golaha, waxayaabihii nooga soo baxayna waxaa ugu muhiimsan arrimahan:-

1. Hanti-dhawrahu waxa uu Golaha uu u soo gudbiyey Xisaab Xidh sanadeedka 2008, 2009, 2010, 2011, 2012 iyo 2013 waxaanuna Golaha u cadaynayanaa in ay yihiin buugaag aan haba yaraatee wadan wax documents cadayn ah (Supported Documents), taasina ay baal marsantahay sida uu faraayo hanta-dhawraha Xeerka Hanti-dhowraha Xeer Lr. 05/95 **Qodobkiisa 16aad farqadiisa C.**

2. Dhamaan Xisaab-xidhyada uu Hantidhawruhu u soo gudbiyey Golaha Wakiilada waa kuwo qabyo ah oo ay ka maqan yihiin xisaab-xidhyada Hay'ado badan oo ka mida dawlada sida:-
   - ✓ Dawladdaha Hoose
   - ✓ Bangiga Dhexe
   - ✓ Dekedda Berbera
   - ✓ Madbacada Qaranka
   - ✓ Wakaaladaha Biyaha
   - ✓ Wakaaladaha Warshadaha laydhka
   - ✓ Haamaha shidaalka Berbera
   - ✓ Hay'adda Waddooyinka iyo kuwa kale.

3. Sida ku cad **Qoddabada 32aad iyo 33aad** ee **Xeerka Nidaamka Xisaabaadka** (Financial regulation Law) oo sheegaya xilka iyo Mas'uuliyadda Hanta-dhawraha Guud ee Qaranka, waxaa xisaab-xidhka 2013 ee uu noo soo gudbiyey ka muuqda in aanu si hufan u qabsan shaqadiisa, maadama oo ay xisaab-xidhkani yahay mid qabyo ah oo ay ka maqan yihiin xisaab- xidhyada Hay'addo badan oo dawladeed sida sare ku xusan, Isla mar ahaantaana wax ka bedelo badan lagu sameeyey aanay waafaqsananyn Xeeraka Qaranka u yaala.

4. Waxaanu Qaladaad iyo iska hor-imaad ka helay buuga Xisaab-Xidhka 2013, kuwaasoo uu hanti dhawraha guud uu noo sharxi kariwaayey ayna noola muuqatay in aanu baadhis ku samayn si mug lehna aanu u eegin, Qaladaadkan waxaa ka mida sida kuwan soo socda:-

| N | Magac | Lacagta | Ref/ | Faah-faahin dheeraad ah |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Dakhliga miisaaniyada ku talo galka 2013 | 750,000,000,000shs | Page 2 | |
| 2 | Dakhliga dhabta ah ee soo baxay | 801,142,492,917shs | Page 3 | |
| 3 | Marka la kala gooyo waxaa soo baxay lacag dheeraad ah 2013 (surplus) | **51,142,492,917shs** | | |
| | | | | |
| 4 | Ku talo galka qarashka 2013 waxaa uu ahaa | 750,742,622,951shs | Page 2 | |
| 5 | Kharashka dhabta ah ee baxay 2013 | 740,772,622,951shs | Page 2 | |
| 6 | Kharashka aan bixin ee 2013 | **9,227,377,049shsl** | Page 2 | |
| | | | | |
| | Marka la isku geeyo dheeraadka soo baxay iyo qarashka baaqday ee bixin ee 2013 waxaa weeyaan | **60,369,869,966shs** | | Meelna kuma cad lacagtani halka ay martay |
| | | | | |

- ✓ Hadhaaga Khasnada 31/12/2013 waxau uu ahaa in uu noqdo 60,369,869,966 sh/sl ($8,624,267.00), hase ahaatee Hantidhawrahu waxa uu ku muujiyey xisaabxidhkiisa Hadhaaga Khasnada 31/12/2013 54,832,620,392 ($7,833,231) taa soo ah mid qaldan.

- ✓ Waxaa sharci darro ah sida ku cad xeerka nidaamka xisaabaadka (Financial regulation law) Qodabkiisa 6aad oo lala akhriyayo Qodabka 16aad ee financial procedure oo sheegaya in Wasiirka Wasaarada Maaliyadu aanu awood u lahayn kaligii inuu isku badalo laba head Madax mashruuc (head project) hadii aanu helin Xeer madaxweyne oo u fasaxaya.

Haddaba sida ka muuqata isku badalada (variations) ee xisaab xidhka 2013 waxaanu u aragnaa in wax ka bedel aan sharciyaysneyn lagu sameeyey, Meelaha qaarkoodna loo isticmaalay qaab ka duwan qaabkii Miisaaniyada loo ansaxiyey, tusaale ahaan waxaynu u soo qaadan karnaa kuwan hoos ku xusan:-

1. **Kharashaadka Isticmaalka adeega Hawsha 15A page 46 & 47 Gurmadka Qaranka** (***2.2.1.30)***, Budget lagu ansaxiyey waxa uu ahaa **9,600,000,000/= ($1,371,428**) waxaana loo bedelay hoosna loogu dhigay **4,800,000,000/= ($685,714)** hadhaagii soo hadhayna waxaa loo kala bedelay **Madax Dayn Qaran (*2.10.10.*) qaybtiisa Gobolada bari 2,10.1.1 oo markii hore lagu ansaxiyey 24,000,000,000/= ($3,428,571) qaybta lagu dayna waxay noqotay 3,600,000,000 ($514,285)** Madaxa kharashka lama filaanka (***2.2.130)*** ee Wasaarada Maaliyada waxaa la geliyey **1,135,000,000/= ($162,142,000).**

2. Madaxa ***2.1.28*** ee **15** Wasaarada Maaliyada oo ah samaynta Miisaaniyada **962,000,000/= ($137,428)** waxaa lagu daray **740,000,000** oo laga soo saaray **15A** (khasnada dhexe) lacagtaas oo wadarteedu tahay **1,700,208,450/= ($242,886)**

3. kharashka dhiirigalinta iyo abaal marinta **2.2.1.37** ee wasaarada maaliyada **15** oo ay ku jirtay **1,200,000,000($171,428)** waxaa lagu daray **850,000,000($121,428)** oo laga soo saaray khasnada dhexe15A wadarta lacagtaas oo ah **2,041,876,312 ($291,696.00)** oo ka kala yimi madaxa ***2.10.10*** oo ah daynta qaranka**220,000,000,** madaxa ***2.2.1.61*** oo ah khasnada dhexe 15A : **500,000,000**

4. Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta (head 21**),** Qalabka boosaha iyo isgaadhsiinta madaxiisu yahay **2.3.1.4** waxaa laga saaray lacag dhan **2,688,000,000 shsl**, **($384.000)** waxaana loo badalay madax kale oo aanay Wasaaradu lahayn oo ah **2.3.2.1** madaxani kuma jiro Miisaaniyadda Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta ee 2013 taasi oo Goluhu ansixiyey, madax kale oo aan hore ugu jirin miisaaniyada ayaa la sameeyey 2.3.2.1 oo noqonaya dhismayaasha cusub ee Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta eeg **page 55** ee buuga Xisaab Xidhka 2013, waxaad kale oo eegtaan buugii Miisaaniyadda 2013 page 34 kuma jiraan madaxani.

5. Dakhliga Buuga lagu cadeeyey waxa uu dhan yahay **81,142,492,913/=** (**Page 9**), ka dib markaanu dib u eegnay isla shaxda **page 9** ee xisaab xidhka 2013 waxaa nooga soo baxay in uu qaldan isugayntoodu ayna dhan dakhliga dhabta ah ee soo xarooday **812,913,558,101 sh/sl**, faraqa u dhaxeeyaan uu dhan yahay **11,771,065,184**/= oo u dhiganta $1,681,580,000.

## Talo soo jeedinta Guddida:-

Guddida Ilaalinta iyo Daba-galka Hanti Qaranku waxay soo Jeedinayaan Qodobadan hoos ku xusa:

1. In Madaxweynahu uu dib u eegis balaadhan oo kor iyo hoos ah ku sameeyo Hay'adda Hanti-dhawrka Qaranka.

2. In Wax ka bedel kaabis lagu sameeyo Xeerka Hanti-dhawrka (Xeer 5/98) oo ku dhisnaa Cahdi Qarameedkii la waafajiyo Dastuurka JSL.

3. In Xisaab-xidhyada 2008, 2009, 2010, 2011, 2012 iyo 2013 ee uu Hanti-dhawraha Guud Golaha keenay lagu wada celiyo si u u soo dhamaystiro, u soo saxo una soo raaciyo cadaymaha iyo Documents (Supported documents) looga baahan yahay.

ALLAA MAHAD LEH

**<u>Gudidda Ilaalinta iyo Dabo-galka Hantida Qaranka ee G/Wakiilada JSL.</u>**